



Abaalmarinada & Isa sharfidda: Ardayda dugsiyada dhexe ee PPS oo lagu maamuusay nadiifinta ku saabsan bandhiga sayniska

Lix mashruuc oo ay wadeen ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa loo magacaabay Broadcom MASTERS, oo horseed ka ah sayniska qaranka iyo tartanka injineernimada ee loogu talagalay ardayda dugsiyada dhexe, isaga oo ahaa qayb ka mid ah Abaalmarintii Intel Northwest Science Expo Middle School ee dhawaan ka dhacday Jaamacadda Gobolka Portland.

Laba mashruuc oo uu soo diyaariyay ardayda Robert Gray ayaa la magacaabay: Maia Schabel oo soo diyaarisay mashruuc magiciisu yahay Cirku waa Qaanso-roobaad “The Sky is a Rainbow,” iyo Ethan Kibbee oo soo diyaariyay mashruuca Caabinta Hawada ee u dhaxaysa Noocyada Baabuurta “Air Resistance Between Model Cars.” Sidoo kale kuwa helay laba mashruuc oo la magacaabay waxay ahaayeen Machadka ACCESS ee Lane: kooxda Alexander Vassilev iyo Austin Yan oo soo diyaariyay mashruuca Shucaaca Microwave-ka iyo Horumarinta Dhirta “Microwave Radiation and Plant Development,” iyo Gabriel Groom oo soo diyaariyay mashruuca Cadaadiska Aan Dhaqdhaqaqa lahayn ee Kabaha Caaga/Goomada ee Fuulitaanka Dhagxaanta Waaaweyn “Static Friction of Bouldering Shoe Rubber.”

Sidoo kale waxaa la magacaabay Stella Gibbons oo ka socotay Winterhaven oo soo diyaarisay mashruuca Heerkulku Saameyn ma ku yeelan doonaa Biyaha Aashitada ah ee leh Gaaska Milmay “Will the Temperature Affect the Acidity of Water with a Dissolved Gas?” iyo Hosford’s Bronwyn Allabastro iyo Zoe Vanderwall oo soo diyaariyay mashruuca Saameynta Tayada Biyihu u leeyihiiin Noolayaasha Degaanka iyo Guulaha dhanka Taranka ee Berri-biyyoodka ‘amphibians’ “Effects of Water Quality on the Biodiversity and Breeding Success of Aquatic Amphibians.”

Mashaariicda waa la gudbin doonaa si tixgelin loo siiyo, iyada oo dadka la soo magacaabay la yareeyay oo laga dhigay 300 ugu sareysa Sibtambar. 4, dadka kaalinta kama dambeysta ah u baxay ayaa lagu dhawaaqay Sibtambar 18, iyada oo tartanka kama dambeysta ah la qabtay Oktoobar 25-26. Tartanka qaran waxaa ku jira abaalmarin sare oo dhan \$25,000.

Dhowr kale oo mashruuc oo ka socday ardayda PPS ayaa abaalmarino gaar ah lagu siiyay dhacdadii NWSE:

- Ka socday ACCESS, Naomi Fertig, oo ku guuleysatay laba qaybood - Mashruuca Aadka u wanaagsan ee Bandhiga Sayniska Hawada ‘Outstanding Project in an Atmospheric Science Exhibit’, iyo Mashruuca Aadka u Wanaagsan ee Sayniska Dhulka ‘Outstanding Geoscience Project’; Jake Yun iyo Ely Cunningham oo soo diyaariiyay Wanaaga Badda ee dhanka Sayniska ama Injineernimada ‘Naval Excellence in Science and Engineering’; Catcher Kemmerer oo soo diyaariiyay Sayniska Aadka u wanaagsan ama Mashruuca Injineernimada ‘Outstanding Science or Engineering Project’ iyo Malia Lee iyo Elizabeth Wickline oo helay Abaalmarinta Biyaha ee Heerka sare ah ‘Water Prize Award for Excellence’.
- Oo ka socday Winterhaven, Stella Gibbons ayaa ku guuleystay Mashruuca Aadka u wanaagsan ee Sayniska Dhulka ‘Outstanding Geoscience Project’; Grace Breger oo ku guuleysatay Qaadashada Xudunta Dhulka ‘Taking the Pulse of the Planet’; iyo Esme Illing oo ku guuleysatay Barnaamijka Aad u wanaagsan ee Tayada Biyaha ‘Outstanding Project in Water Quality’.
- Finn Suchara oo ka socday Robert Gray ayaa ku guuleystay Abaalmarinada Gaarka ah ee IEEE.
- Francis Vowels iyo Joseph Moylan oo ka socday Bridlemile ayaa midkiiba ku guuleystay Mashruuca Aadka u wanaagsan ee Ardayga Fasalka 5^{-aad}.

Dhowr kale oo ah ardayda PPS ayaa la geliyay abaalmarinada qaybta. Dhammaan dadkii guuleystay, ka fiiri [Liiska Abaalmarinada Dugsiga Dhexe ee NWSE](#).

Dhacdada waa lagu qabtay isla goobtii iyo isla waqtigii ay dhacday Intel NWSE Science Expo ee loogu talagalay ardayda dugsiyada sare. Tartanka dugsiga sare ayaa ku soo dhamaaday kooxda Oregon oo gobolku ku matali doonta Bandhiga Caalamiga ah ee Sayniska iyo Injineernimada ee Intel oo bisha soo socota ka dhacaya Phoenix, Arizona. Laba arday oo ka tirsan PPS ayaa boos ka helay: Tyler Mapes oo ka socday Franklin oo lahayd mashruuc magaciisu yahay Xisaabta Dirida Gantaalka “Calculus of a Rocket Launch,” iyo Natalie Wang oo ka socotay Lincoln oo lahayd “Characterization of the Role of Catalases in Hydroxyurea Toxicity.”

Macallimad ka socota Wilson oo la maamuusay: Macallimada ka tirsan Dugsiga Sare ee Wilson ee Jamie Suehiro waa mid ka mid ah afar macallin oo ku guuleystay Dabaaldega Abaalmarinta Wax akhriska/Qorista, oo lagu sharfo macallimiinta degaanka Portland ee muujisa ballanqaad heer sare oo ku aadan wax akhriska/qorista.

Suehiro oo waxay dadka bartaa Ingiriisiga, waxayna guddoomiyaha waaxda, hoggaanka waxbarashada iyo iskuduuhaha AVID ka tahay Wilson. Waxay abaalmarinteeda heli doontaa Maajo 8 taasi oo ah xafladda ka dhacaysa Dugsiga Dhexe Parkrose. Abaalmarinta waxaa loogu talagalay macallimiinta dugsiyada degmooyinka ee degaannada Multnomah iyo Clackamas, iyo Beaverton, Sherwood iyo Tigard-Tualatin.

Suehiro waxaa soo magacaabay saaxiibkeeda ah macallimada Xisaabta ka dhigta Wilson, Jaydra Johnson, oo warqadeedii magacaabista ku qortay waxyaabo ku saabsan deeqsnimada hoggaamineed iyo xirfadeed, awooda ah in ay ardayga ku lug yeeshaan qoraalada adag, iyo dadaalka ku aadan kala duwanaanshaha dadka ee Suehiro.

“Waa mid qalbiga ka soo go’day isla markaana aan turxaan lahayn in aan iyada u soo jeediyo abaalmarinta sanadkan,” ayay qortay Johnson. “Waxaan shaki ku jirin in ay iyadu tahay macallimad kor u qaada isla markaana u dooda wax akhriska/qorista kuwaasi oo ah dhammaan heerarka kala duwan ee nidaamka dugsigeena.

West Sylvan oo ku guuleystay gobolka. Kooxda qoob ka ciyaarka ee West Sylvan ayaa ku guuleystay horyaalka gobolka ee qaybta weyn ee dugsiga dhexe ee tartankii dhallinyarada ee dhawaan ka dhacay Dugsiga Sare ee Woodburn.

Kooxda, oo ay tababareen isla markaana farsamada qoob ka cayaarka bareen Jasmin Calvillo-Ruelas, Keeley Driscoll, iyo Kerry Driscoll, ayaa horyaalka gobolka ku guuleystay markii 11^{-aad} tani iyo 2004.